

Macluumaad ku saabsan barnaamijka Abaalmarinta Sanadlaha ah ee Waayeelada reer Victoria

Somali | Soomaali

OFFICIAL

Abaalmarinta Sanadlaha ah ee loogu talagalay Waayeelada reer Victoria waa mid loogu dabaaldegayo dadka waayeelka ah ee bulshada si isxilqaan ah ugu shaqeeya. Abaalmarintan waxaa sanad kasta lagu dhawaaqaa bisha Oktoobar.

U-qalmitaanka

Waxaad u magacaabi kartaa abaalmarintan qofka aad is leedahay waa qalmaa. Qofka aad u magacaabayso waa inuu ahaadaa:

- muwaadin ama qof joogta u degan Australia
- qof degan Victoria
- qof jira 60 sano amaba ka weyn, ama qof Aboriginal ah iyo/ama Torres Strait Islander ah oo ku nool Victoria oo jira 50 sano ama ka weyn.

Noocyada abaalmarinta

Waxaa jira 6 nooc oo abaalmarino kala duwan ah:

Abaalmarinta Golaha Waayeelka (Council on the Ageing - COTA) Abaalmarinta Dadka Waayeelka ah ee reer Victoria

Abaalmarintan waxaa lagu aqoonsadaa ama lagu sharfaa horyaallada bulshada maxalliga ah ee si wanaagsan uga faaiideysta da'dooda weyn iyagoo markaas wax u qabanaya bulshadooda.

Abaalmarinta Saamaynta Soo koraysa (Emerging Impact Award)

Abaalmarintan waxaa lagu sharfaa qof ku cusub howlaha is-xilqaanka ah si lacag la'aan ah dadka ugu shaqeeya isla markaasna saameyn weyn ku leh bulshada ay la nool yihiin.

Abaalmarinta Waayeelnimada Togan (Positive Ageing Award)

Abaalmarintan waxaa la gudoonsiiyaa qof wax badan u qabtay dadka waayeelka ah ee bulshadooda ka tirsan qofkaas oo si toogan u dhiirigelinaya waayeelnimada.

Abaalmarinta Dhiirigelinta Dhaqamada-badan (Promotion of Multiculturalism Award)

Abaalmarintan waxaa la gudoonsiiyaa qof kaalin muhiim ah ka qaatay dhiirigelinta faa'iidooyinka ku jira dhaqamada kala duwan ee bulshada ay ku dhex nool yihiin iyo guud ahaan tan Victoria oo dhan.

Abaalmarinta Halyeeyada Bulshada (Veteran Community Award)

Abaalmarintan waxaa la gudoonsiiyaa qof kaalin muhiim ah ka qaatay in wax loo qabto halyeeyada bulshada. Qofka helaya abaalmarinta uma baahna inuu noqdo qof ciidan ka soo shaqeeyey.

Abaalmarinta Gubanatooraha ee loogu talagalay in la gudoonsiiyo Waayeelka Sanadka ee Gobolka Victoria (Premier's Award for Victorian Senior of the Year)

Abaalmarintan waxaa la gudoonsiiyaa qof kaalin wanaagsan oo waarta ka geystay waxqabadka bulshadooda iyo Victoria. Abaalmarinta Madaxa Dawlad Gobolkeeda ee loogu talagalay in la gudoonsiiyo Waayeelka Sanadka ee Gobolka Victoria maaha mid ay dadku usoo magacaabi karaan qofkay la rabaan. Waayeelada u qalma in loo magacaabo abaalmarintan ee qeybta ka ah dhamaan qaybaha kala duwan ee abaalmarinada kale ayaa loo tixgelin doonaa abaalmarintan.

Wax badan ka ogow

Si aad qof ugu magacowdo abaalmarin, waxaad u baahan doontaa macluumaadka qofkaas. Taas waxaa ka mid ah:

- magacooda
- da'dooda
- meelaha lagala xiriiri karo
- tusaalooyin ah sida ay u caawiyaan dadka kale ee bulshada ka tirsan.

Si aad wax badan uga ogaato Abaalmarinta Waayeelka Sanadka ee Gobolka Victoria:

- booqo [khadka internet](https://www.seniorsonline.vic.gov.au/awards) ka ee waayeelada <https://www.seniorsonline.vic.gov.au/awards>
- wac 8850 6164.

Nala soo xiriir si aad dukumiintigan ugu hesho qaab kale. Fadlan ka wac kooxda Xafladda Waayeelada Victoria nambarka 8850 6164 ama email ugu dir seniorsfestival@dffh.vic.gov.au.

Haddii aad tahay qof dhegool ah, ama qof maqalku ku adag yahay, ama aad qabto dhibaato hadal/isgaarsiineed fadlan nagala soo xiriir khadka wicitaanka ee [Adeega Gudbinta Qaranka \(National Relay Service – NRS\)](#)¹ haddii aad sidaas doorbidayso. ka bacdina, la wadaag NRS nambarka taleefoonkeena oo ah 8850 6164. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [Wixii ku saabsan Adeegga Gudbinta Qaranka](#)²

Waxaa oggolaatay oo daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Gobolka Victoria, Australia, Waaxda Qoysaska, Cadaaladda iyo Guryaha, bisha Maarso 2026.

ISBN 978-1-76171-056-8 (pdf/online/MS word)

Waxaa laga heli karaa [khadka internet](#) ka ee waayeelada <https://www.seniorsonline.vic.gov.au/awards> (2603546 iyo 2603544)

¹ <https://www.accesshub.gov.au/about-the-nrs/nrs-call-numbers-and-links>

² <https://www.accesshub.gov.au/about-the-nrs>